



Su'aalaha iyo Jawaabaha ku sabsan ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs

Waa maxay ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs?

ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs waa tijaabooyin lagu eego luqada Ingiriiska heerka qofka u ka joogo ee u dagsan gobolka iyo fedeeralka sharcyaana la iska raabo. Tijaabooyinkan waxa lagu eega horumarka qofka Ingiriiska baranayo intaa aay waxbarashadooda watan sida xirfadaha aqrinta, qorista, dhageysiga, iyo ku hadalka.

Maxaannu u bixinnaa imtixaamadaan?

ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs natijooyinkooda waxay sheegan aqbaarad aad muhiim u ah kuna sabsan qofka Ingiriiska baranayo horumarkisa qoyskisa iyo dugsigaba. Qoysaska waxay isticmaali karan heerarka natijooyinka iyo sharaxaddaha si aay u fahman horumarka ilmahooda sameynayo iyo si aay dugsiyada uga qeybgaliyaan waxbarashada ilmahooda.

Macalimiinta iyo dugsiyada waxay u isticmali karan natijooyinka iin aay ardeyga ku kor meeran horumarkisa fahanka luqada Ingiriiska, aay qorsheeyan, isla markana qiimeeyan horumarka barnamijaya luqada. Dugsiyada waxay sido kale u isticmalian natijooyinkan haddii u ardeyga u bahanyahay in u ka baxo barnaamij lagu barto luqada Ingiriiska.

Dugsiyada – iyo – naatijooyinka heerarka degmooyin waxa loo isticmala in lagu eego isla-xisaabtanka cabiriista fedeeralka iyo gobolka.

Yay shardi ku tahay in ay imtixaammadaan qaataan?

Dhamman bartayasha luqada Ingiriiska ee faasalada K–12 ee dhigta dugsiyada bulshada waxay ku tahay waajib in aay ka qayb qatan tijaabo luqada Ingiriiska saanadkiiba. Marka laga reebo qaar, dhamman bartayasha luqada Ingiriiska waxay qatan ACCESS ee ELLs.

Ardeyda haysta Baraamijka Waxbarashada Shaqsiga (Individualized Education Program - IEP) ama qorshaha 504 loo yaqaan, waxa laga yabaa in aay heelan tixgaalin gaar ah. Tixgaalinta gaarka ee xagga warqadda wax ka mid ah in faar waa weyn wax loogu qoro ama xarfaaha dadka indhaha la ee la dareemo buggagta imtixaanka la siyo.

Ardeyda leh curyanimo awoodyarii saiid ah waxa laga yaaba in aay u qalman Badalka ACCESS ee ELLs intaa aay heli lahayeen ACCESS ee ELLs. [Eeg Badalka ACCESS ee ELLs Doorka Heelitaanka Ka Qeyb-galkisa Sharucda u Taal.](#) (Gal qeybta Districts, Schools and Educators > Teaching and Learning > Statewide Testing > Minnesota Tests.)

Sidee imtixaamada loo qaadaa?

Ardeyda badankooda waxay ku qatan ACCESS ee ELLs qab kombuutar ah, laakinse waxa jiro caifiisyoo waxay na ku xirantahay faasalka iyo heerka (aqriinta, qoriista, dhagaysiiga, ama hadalka).

Macalimiinta waxay ulaa shaqeeyan ardey waliba mid-mid si aay u bixiyaan Badalka ACCESS ee ELLs iyago isticmaalayo agaab warqado ah.

Siiday ardadu ugu diyaargaaroobaan imtixaamadaan?

Ardeyda uma bahna in aay bartan ama isku diyariyaan imtixaanka ACCESS ee ELLs ama Badalka ACCESS ee ELLs. Macalimiinta ayaa siinaayo ardeyda fursad aay ugu diyar garoowan imtixaanka iyaga u qadanayo imtixaan la mid ah midka saxda iyado la isticmalayo su'alo la mid ah si aay ardeyda ulaa noqdan la dariis waxa aay u bahanyhiin maalinta imtixaanka.

Maxaa loo baahanyahay si imtixaamka looga gudbo?

Ardeyda uma bahno in aay ku baasan ama ku dhacan imtixaanka ACCESS ee ELLs ama Badalka ACCESS ee ELLs. Madama imtixaanadan aay cabiiraan bartamaha luuqada Ingiriiska awoodiisa fahanka iyo celinta luuqada, ardey waliba wuxu heela naatijo cadeyn luuqada heerka u ka joogo natijio ka bilaawato 1–6.

Waa kuwee xirfadaha lagu qiimaynayo ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs?

ACCESS ee ELLs wuxu caabira awooda luuqada Ingiriiska sida aqriinta, qoriista, dhagaysiiga, iyo ku hadalka sida ku qexa qaynuunka loo yaqan WIDA Takhasuuskisa Luuqada Ingiriiska Heerarka Horumarkeeda (English Language Development - ELD). [Eeg WIDA Taakhasuuskisa Luuqada Ingiriiska Heerarka Horumarkeeda](#) (Gal qeybta WIDA > Standards & Instruction > English Language Development (ELD) Standards).

Badalka ACCESS ee ELLs wuxu caabira awooda aqriinta, qoriista, dhagaysiiga, iyo xiirfahada ku hadalka iyaado loo eegayo sida ku xuusan Badalka Shageeyasha Habka Ka Guul Gariista (Alternate Model Performance Indicators - AMPIs).

Sideen ku arki karaa natijjooyinka ACCESS ee ELLs iyo Badalka ACCESS ee ELLs ee canuggayga, dugsiga iyo degmada?

Dugsigaga wuxu heelayaa warbixin gar ah u oo leyahay ardey waliba ee cunug waliba waxana lagu siinayaan aqbaarad dheeri ah. Warbixiintan wuxu ku toosaya cunugaga sida u yahay eegiistisa waxana ka mid ah naatijjooyin luuqad waliba herkeeda iyo naatijjooyin la isku dardaray.

Dugisyada iyo degmooyinka naatijjooyinkooda waxa laga heela Kaarka Warbixiinta Minnesota qeybtiisa Xaruunta Macluumadka ee MDE bartooda intarneedka saran. [Gal Qeybta Minnesota ee Kaarka Warbixiinta MDE](#) (Gal qeybta Data Center > Minnesota Report Card.)

Wixii maclumaad dheeraad ah, la soo xariir:

Statewide Testing
mde.testing@state.mn.us

Minnesota Department of Education
1500 Highway 36 West
Roseville, MN 55113-4266
<http://education.mn.gov>

Siibteembar 2018